Qalabka looga baahan yahay: kabadh hal dhinac lagaga da boolay bac

i. Ilkul
ii. Laba tunbo oo ka samey san warqad.
iii. Warqade qiiqa

Habka laraacayo: isugu xidh qalabka sida ka muuqada Jaantuska 4.5 fiiri, oo sharax waxa kudhacay qiiqa.

- Sharax habka wareega kulka.



Jaantuska 4.5 Wareega hawada ama (sanduuq qiiqaya)

Jaantuska 4.4 iyo 4.5 hawadu waxay kulka ka heleysaa shamac gubanaya. Hawada kululaatey kor ayey ubaxaysaa sababtoo wayka cufnaan fududahay hawada kuwareegsan hawada qabaw way culus tahay waxayna u kacdaa hoos waxayna badeshaa hawada kulul meesheeda. Hawada qabow waxay soo noqotaa iyadoo kulul. Hadaba Jaantuska 4.4 iyo jan 4.5 waxay ina tusayaan Gudubka kulka ee wareega hawada.

Gudubka kulku uu ka gudbayo meel ilaa meelkale ee socodka caadiga ah ee qurubyadu ku dhexmarayaan dhex yaalada ayaa layidhaah:- wareega kulka.
Wareega kulku wuxuu ka dhax dhecaan asal ahaan dareerayaasha (neefa ama dareeraha). Wuxuuna sababaa fidida qurubyada dareeraha marka la kululeeyo. Marka ay qurubyadu fidaan cufnaantiisu way yaraataa. Sidaas darted qeybta aad ufududaataa way baxdaa, dareera qabowna wuxuu bedalee booskii dareeraha kulul, waxayna helaan kul. Wareege kulku wuxuu ku socdaa dhexyaal. Wareega kulku wuxuu kadhex dhacaa kaliya dareeraha iyo hawada.

Gudbida kulka ee wareega ah waxaa loo adeegsadaa guryaha, warshadaha iyo guud ahaan, ba

1. Qaboojiyaha, **kulayliyaha** iyo baylinta biyaha waxaa loo isticmaalaa wareega kulka.
2. Dhulka iyo neefsiga badu sidoo kale waxay kushaqeeyaan wareega kulka. Dabayshu waxay ka soo kacdaa bada waxay na usoo baxdaa xagadhulka. Wakhtiga habeen kii. Dabayshu sidookale waxay kasoo kac daa xaga dhulka waxayna usoo kacdaa xaga bada maxaa yeeley waxaa kaladuwan heerkulka
3. Biibiida kamuuqata Jaantuska 4.6 waxaa loo isticmaala wareega kulka.

Jaantuska 4.6 Biibii waxaa loo isticmaalaa wareega kulka

iii. Shucaaca

Hawlgalka 4.8

***Wade falanqeeyaa*: i) Sidee buu kulku ka imanaya ca-ceedu ku soo gaadhayaa dhulka.**
ii) Sidee buu ilayska cadceedu isugu badalaa kul marka uu dhulka soo gaadho?
iii) Maxaa loo yaqaanaa kul gudub ka noocan ahi

Kulka ugudbaye shucaac ahaan waxaa loo yaqaanaa. Kulka shucaaca. Kulka shucaaca waxaa qaada hirarka birlab danabawga ee loo yaqaan **firidhka hirarka**. Kanina maaha mid umuuqan kara indhaha bani, aadamka.

Dhamaan walxuhu waxay soo daayaan kul shucaac. Tusaale ahaan, haddii walaxdu ka kulu shahay wax yaabaha kuwareegsan, markaasna waxay sii daynaysaa (kulka shucaac waxayna lumineysaa kul way na qaboobeysaa. Kulka ka imanay kuleyliyaha korontada iyo kulka ka, iminaya dhuxul gubaneysa. Waxay kusoo gaadhaan waxyaabaha kuwareegsan. Shucaac ahaan. Tusaale ahaan marka aynu agfadhinsatid, dabka waxay nu daree may naa diirimaad. Hadaba Taabashada iyo wereega kulkuba halka kama suurto galayaan. Maadaama oo ay hawadu tahay gudbiye daciifah, hawada diiranna waxay ukacdaa kor,

Kulku dabku wuxuu kusoo gaadhaa jidhkeena shucaac ahaan, kulku wuxuu ugudbi karaa shucaac ahaan isagaoo dhexmaraya duludaatiga madhanaha ah ama qalab dhaxyaalkaah
Shucaacu waa qudublka kullk, ee meel ilaa meelkale, isgoon ubaahneyn qalab uudhexmaro kulku cadceeda dhulka wuxuu ku soo gaadhaa habka shucaaca; kulku waxa uu ku gudbikaraa shucaac dulu laatigamadhanah ah nooca oogada walaxda ayaa waxay sameysaa sida deg dege ah ee walexdu ukululaato hadi ogadu tahay raf oo ay tahay mid madaw. Waa sidaaye fiican, wuuna kuhakadaa shucaacu.
Halka walaxda dhalaalaeysa ee aadudhalaala ee leh oogo siman waa soodaaye daciifah, wuuna nuugaa shucaaca kulka

Hawlgalka 4.9 Wadafalanaqeeya su, aalahan soosocda.

- **Maxaad utaqaanaa tibxahan. Qeex, oo tusaale kabixi, nuuge kulka, Noqodka kulka, iyo soo daynta kulka.**

Hawlgalka 4.10 Fiiri qalabka ugu fiican ah ee shucaaca kulka

***Qalabka loobaahanyahay:* Laba daasadood oo isku midah, oo mid cadaan lagu buufiyey mida kalena, madaw, Heerkul beeg, ileyska cadceeda**

***Habka laraacayo:* Ka buuxi labad daasadood. Xadi iskumida oo biyo ah**

- **Dhex dhiga Heerkulbeega daasad walba oo udaa cadceeda laba daasadoodba**
- **Cabbir heerkulka biyaha ee labada daasadood oo qor natiijada kasoobaxda.**
- **Sawir garaafka heerkulka iyo Aminta.**
- **Bedelka aminta sida ka muuqada Jaantnska 4.7**
- **Sawir garaafka heerkulka iyo aminta ee labade daasa dood.**
- **Qalab kee (daasadee baa) kul badan nuugay sa**

Shucaaca kulka waxaa lagu ilaaliyaa dhismaha guryaha, kuleylinta dharka qaar kamida, falaasada tusaale, dhismayaasha guryuhu aadbay uqabawyihiin, gaar ahaan qalabka lagu sibdhiyo gidaarka, iyo saqafka sare kulku wuxuu siinayaa diirimaad guriga, guriguna wuu nuugayaakulka waana nuuge fiican islamar kaana wuxuu kuleylkii kusoo celinaya guriga.

Dad ka ku nool meelaha kulul waxay xidhaan dhar cadcad oo celiya shucaaca kulka maxaa yeelay dharka cadcad waa nuugayaal daciifa.



Jaantuska 4.7 Fiirinta nuugaha fiican ee shucaaca kulka

Xaqiijin 4.1

1. Xaladee ayuu kulku walax ka tagaa oo uu, utagaa walax kale?
2. Sheeg saddexde hab, ee, uu kulku ugudbo?
3. Kala saar farqiga udhexeeya habka taabashada kulqudbinta iyo habka wareega eekulgudbin.
4. Sharax gudbiyayaasha iyo magudbiyayaasha kulka
5. Sidee buu shucaaca kulka ee ka imanaya cad – ceedu ku soo gaadhaa dhulka?

4.2 Xadiga Kulka

Fikradaha ugu muhiimsan ee aan qaybtan ku baraneynaa waa xadiga kulka iyo kulqaadka kiilogaraam ee walxaha.

hawlalka 4.11

Qalabka loo baahanyahay: ilkul, laba kubadoo oo bir, ah, mid yar iyo mid weyn. Bir qotonto'ah, xabag, iyo baaldi biyo ah.

i. Dhig laba kubadood biyaha dhexdooda
ii. Kulayli biyaha ilaa intey biyuhu ka karayaan.
iii. Soo qaado qurub weyn iyo qurubyar oo bir, ah biyaha kar karaya oo dhexdhig xabagta.
iv. Qurubyadii kee bay xabag badani kumilantay
v. Walaxdeebaaleh xadiga kulkeedu badan yahay?
vi. Taasi maxay ina tusay saa.

Marka ay walaxi qabawdo waxay lumisay tamar kul. Marka walaxda lakulayliyana waxay qaadatey tamar kul. Walaxda kulku wuxuu ka soo gaadhaa ilo kala duwan.

Dhab ahaantii ma cabbiri karno wadarta xadiga kulka ee ay walaxdu leedahay. Laakiin waxaan cabbirkarnaa, tamar intee le,eg bay qaadatey ama lumisay, Hadaba side baynu u cabbiraynaa xaddiga kulka ah ee ay walaxdu lumisay ama ay qaadatey?

Kulqaadka kiilogaraam kiiba

Xadiga kulka ee tamar ee loo baahan yahay inuu ku kaco heerkulka 1kg oo cuf ah oo walax, 1^oc ayaa layidhaah daa kulqaadka kiiloo garaam kiiba ee walaxda.

Shaxda 4.1 waxay inoo sheegay saa kulqaadka kiiloogaraamkiiba ee dareerayaasha iyo biraha halbeega kulqaadka kiilogaraamkiiba waa:- Joule/kg c^o = (J/kgc^o)

Tusaale: 1 kg oo almuuniyamah ayaa wuxuu ubaahan yahay kultamareed dhan 900J oo uu farqiga heer kulkeeduyahay 27c^o. laa 28c^o. Haddii Heerkulka almuuniyam ka soo dhaco 28c^o ilee 27c^o, oo uu soo saaro tamar dhan 900J. Sidaas darted qaacidada guud ee lagu xisaabiyo Tamarta kulka. Waa:-

Tamarta kulku = cufka × kulqaadke kiiloo garaa mkiiba × farqiga Heerkulka

$Q = m \times c \times (T_2 - T_1)$ Halka:

Q = xadiga kulka

m = cufka walaxda

c = Kulqaadka kiiloo garam

($\Delta T = T_2 - T_1$) Farqiga Heerkul ka

Shaxda 4.1 kulqaadka kiilogaraamka walxaha qaarkood	
Walxaha	c (ee J/kg0c)
• Biyaha	4200
• Biyomilix leh	3000
• Alumuuniyam	900
• Birta	480
• Maarta	385
• Naxaas	130

Sida shaxda 4.1 waxaan ogsoonahay in kulqaadka kiiloogaraam kiib ee adkayaa, sha ay aad uyartahay kulqaadka kiiloo garaamka dareerayaasha. Tusaale ahaan biyuhu waxay ubaahan yihiim shan laabka in ta kulka ah ee uu ubaahan yahay cufka almuuniyamku.

Tusaale 4.2

1. Kul intee le,eg ayaa looga baahan yahay Hadii heerkulka bir cufkeedu yahay 500g yahay, 50°c ilaa 250°c (c = 480 Jk/kgc°).

Siin	Weydiin	Furfuris
m=500g = 1/2 kg	Q = ?	Q = mc ΔT
T_i = 50 °C		= 0.5kg × 480J/kg °C ×200 °C
T_f = 250 °C		= 48,000J
c = 480J/kg °C		= 48 kJ

2. Waa imisa kulka ay lumisay maarleh cuf dhan 2000g. marka la qaboojiyo 100°C ilaa 40 °C? c = 385 J/kg °C?

Siin	Weydiin	Furfuris
m = 2000g=2kg	Q = ?	Q = mc ΔT
T_i = 100 ^{0}C		= 2kg ×385J/kg °C× −60^{0}C
T_f = 40 ^{0}C		= - 46,200 J
C = 385 J/kg °C		

Xusuus: Calaamada tabani waxay sheegay saa luminta kulka.

3. 200g oo maar ah ayaa laqaboojiyey 100 °c ilaa 0°c, Hadaba kul intee dhan ayey lumisay maartani? (C = 385jkgc°)

Siin	Weydiin	Furfuris
m = 0.2kg	Q = ?	Q = mc ΔT
T_i = 100 °C		ΔT = T_f - T_i
T_f = 0 °C		= 0 °C – 100 °C
C = 400 J/kg °C		= – 100 °C
		Q = 0.2kg ×385J/kg °C×(-100 °C)
		= - 7700 J

Xaqiijin 4.2

1. Waamaxay kulku?
2. Goormaan odhan karnaa walaxdu kulbey qaadetey.
3. Sheeg xaddiyada kulqaadashada iyo kulbixintu ku xidhan yihiin
4. Qor is le, egta xadiga kulka ee walax?
5. Qeex kulqaadka kiilogaramkiiba

Soo koobbidda cutubka

Cutubka waxaad kusoo baratay

- Kulku waa nooc tamarta kamida kaasoo halbeeggiisu yahay joule (J). marka heerkulku uu yahay cabbirka kuleylka iyo qabowga walaxda. Kulku wuxuu ka gudbaa walaxda heerkulka sare leh wuxuuna ugudbaa walaxda heerkulka hoose. Sadexda hab ee uu kulku ku gudbo waa:-
  i) Taabashada kulka
  ii) Wareega kulka
  iii) Shucaaca kulka
- Kul gudbiyayaashu waa qalabka ogolaada inuu kulku dhaxmaro. Magudbiyayaasha kulkuna waa qalabka aan ogolayn inuu kulku dhexmaro.
- Xadiga kulka ee ay walaxdu lumiso ama qaadato waa saamigalka aasaasiga ee cufka walaxda, Heerkulkeeda, iyo walaxda qaabkeeda. Xadiga kulkana waxaa lagu raadiyaa $Q = mc\,\Delta T$
- Kulqaadka kiilogaramkiiba ee walax waakulka ay walaxdu ubaahan tahay inay kor ugu kacdo heerkulka I kg ee $1^{o}c$. Halbeege caalamiga ah ee K.Q.K. waa $Jkg^{o}c$ ama jkgk Biyaha ayaa ugu K.Q.K badan dhamaan dareereyaasha

Nakhtiinka su'aalaha iyo masalooyinka

I. Kubuuxi meesha banaan ereyga ku haboon .

1. _____ Waa cabbirka celceliska tamar socod ee qurubyada walaxda
2. _____ Waa halbeega caalamige ah tamarta kulka
3. _____ Waa gudubka kulka ee ay laba walxood istaabanayaan
4. Qalabka aan uogolaanin kulku inuu dhex maro ayaa layidhaa hdaai_____.
5. _____ Waa kulka ay walaxdu ubaahan tahay 1kg cuf ah (1°C)

II. Kajawaab su'aalahan

1. Sharax habka wareega uu kulku ugudbo.
2. Tusaale kabixi gudbiyaasha kulka iyo magudbiye yaash.
3. Sheeg saddex hab ee kulku ku gudbo.
4. Qeex kulqaadk kiilogaraamka.
5. u qeex ereyo ahaan qaaciidadan ($Q = mc\,\Delta t$)

III. Kashaqee

1. Haddii heerkulka walax cufkeedu yahay 0.5kg ayaa $15^{o}c$ ilaa $20^{o}c$. Waa imisa kulka ay qaadatey walaxdu (haddii c = 400 j/kg).
2. Waa imisa xadiga kulka ee ay walaxi u baahantahey haddii cufkeedu dhan yahay 2kg, heerkulkeeduna yahay $20^{o}c$? (c = $4200Jk^{o}c$)
3. Haddii xadiga kulka ee almuuniyam cufkeedu yahay 3kg yahay 5400J. Waa imisa heerkulku? (haddii = $900\ j/kg^{o}c$).

Cuttubka 5aad

DANABKA IYO BIRLABDANABOWGA

Ujeedooyinka cutubka: Cutubkani marka uu dhammaado ka dib waxaad awoodi doontaa in aad:

- ✓ Fahamtid Fikradaha la xidhiidha Danabka iyo Birlabdanabowga xidhiidha Danabka iyo Birlabdanabowga.
- ✓ Koru qaadid xirfadaha xallinta Masalooyinka ee la xidhiidha Danabka iyo Birlabdanadeedka
- ✓ Ku Dhiiranaashaha xidhiidhka ka dhexeeya walxaha Dhammaan
- ✓ Isticmaashid waxyaalo badan oo suurtogal ah in aad ku kordhisid Aqoonta fikradaha ugu muhiimsan ee fisigiska

Hordhac

Waxaad Ku soo baratay Danabka iyo Birlabdanabeedka Fisikiskii Fasalka 7aad Waxaad ku bara doontaa waxyaalo badan oo ku saabsan cinwaankan Fasalkan iyo cutubkan. Xidhiidhka ka dhexeeya korontada iyo Birlabdanabeedka. Iyo isticmaalkeeda dhaqaale ee Dalkeena iyo horumarinta Bulshada ayaa lagu baran doonaa.

5.1 Samaynta Qulqulka Korontada, Duubiga Mareegta iyo Fooltejka

Hawgalka 5.1

Kala Dood waayo – Aragnimooyinkan soo socda saaxiibadaa iyo waalidkaaga :

b) Sidey u wareegtaa qulqulka Danabku?

t) Waa maxay shaqada fooltejku (Dhagax)?

j) Waa maxay mareegta Danabku?

x) Caddee isku – mid ahaanshahooda iyo kala duwanaanshaha Biyo dhex-qulqulaya qasabad iyo elektaroono dhex qulqulaya xadhiga dabka? (jaantuska 5.1)

Saari doonaa socodka Danabyada Ama qulqulka Danabka. Qulqulka danabka ee Mareegta Danabku wuxuu aad ugu eg yahay qulqulka Biyaha ee dhexmaraya meel xidhan (Fiir jantuska 5.1). A wood

qeeybiyaha (dhagaxa) waxuu ku began yahay taangiga Biyaha, caabiguna wuxuu ku began yahay qeybta qasabada ee dhuuban. Cadaadiska ka soo baxaya tuuraha (pump) xagiisa sare waxuu aad ugu eg yahay foolteyjka dhinac dhammaadka awood qeybiyaha ee (+) ah. Qulqulka Danabku wuxuu ku began yahay saamiga biyaha ah ee maraya.



Jaantuska 5.1: Isbarbar-dhiga Biyo maraya qasabad – dhexdeed iyo elektaroonada maraya xadhiga dabka dhexdiisa.

Si aan u horumarino faham laysku halayn karo Ama waxtar leh oo ku saabsan Danabka, Duubiga mareegta iyo foolteyjka. Haddaan u qaadano Bani – aadamka sidii oo " xadhig- danab- Bani- aadameed" waxay noqon hawlgal xiiso leh.

Samaynta Socodka Danabka ee Gudbiyaha

Jaantuska 5.2 Samaynta socodka danabka ee gudbiyaha

Ardayda Fasalka oo dhammi waxay u noqon muunad (Tusaale) socodka Danabyada ee Gudbiyaha dhex maraya. Aan kaga Bilowno Ardayda dhinac jiiftaxa (xagga hore ilaa xagga dambe) si ay u noqdaan xadhig dabka oo kale. Sanduuqa yaala Fasalka xaggiisa hore waxuu metelayaa Beytarigii (dhagaxa Dabka) sanduuqa waxaa dhinac lagaga ranjiyeeyey calaamada tabnaanta, ka soo qaad in sanduuqa ay ku jiraan 100 dhagax oo yar- yar oo leh xajmiga fataatiiraha. Waxaa lagu qori karaa xarafka "e" iyaga waxayna u taagan yihiin elektaroon. Ardaydu waxay istaagi sanduuqa agtiisa, waxayna ka riixi dhammaantood sanduuqa dhinaca calaamada taban Ama laga jarayda leh. Ardaydaasi waa muunad (Tusaale) u taagan xoogga dhaqaajinta Danabka (Emf). Emf –ku waa tamar keydka taasoo qabata shaqada ayadoo kala saaraysa Danabyada si ay ugu samayso in ay u safraan meel kale. Baytariga (Dhagaxa), tamar keyd is dheeridu waxay ka timaadaa Falka kiimikaad taas oo kala qeybisa Danabyada, u riixdana elektaroonada dhinaca taban. Tamarkeyd is – dheeridu waxay noqon kartaa mid uu dhaaliyo matoor.

Ama unuga foolta si loo bilaabo qulqulka Ardayda ugu xigta “Baytarigu” waxay heli elektaroonka dhagaxa Tamar keyd is – dheerida qofku waxay ka gudbi dhagaxa elektaroonka ee gacanta qofka ku jira waxayna u gudbi qofka kale. Ardayga ugu horeeya elektaroonku waxuu uga gudbi ardayda isdaba – joogta. Habkani uu socon ilaa “ Dadka – xadhiga) Ama dadka xadhiga laydhka noqday ay ku soo celiyaan dhinacii tognaa ee elektaroon ku yaaley. Tamar keyd isdheeridu si degdeg ah ayey ugu riix daa elektaroonada Ayadoo ka soo riixaysa dhinaca togan una riiaysa dhinaca taban. Halkan waxan ka soo qaadeynaa in gudbiyaha ay elektaroono xor ahi ka buuxaan. Marka hal elektaroon ka yimaado dhinaca tabanaha ah ba isla markiiba elektaroon kale ayaa soo gala dhinaca togan ee baytariga (dhagaxa). Tusaalaha (Dab – gudbin bani – aadameedeka) ee socodka elektaroonada gudbiye wuxuu u dhacaa sida Mareegta Danabka.

Dhaqan ahaan (Dabeecad), qulgulku waxuu u dhacaa qalqulka Danabka togan, xilliyadii qarniyadii hore ee qulqulka qeexdiisa la yaqaanay waxba lagama Aqoon elektaroonada.
Saynisyahanadu waxay ogaadeen in Danabka togani uu Dhex maro xadhiga –Dabka, laakiin may garanayn. Waa in aad ogaataa in qulqulku yahay socoka Danabka taban. Inagoo eegayna Dabeecada heeda (dhaqan ka), Waxaan u qaadaneynaa qulqulka Danabka socodka Danabka tagan ee ka yimaada dhinaca togan ee Beytariga (Dhagaxa) . Waa inaad ku qanacsan tahay in kaalinta Tamar keyd – isdheeridu ay tahay kala soocida Danabyada iyo kaalin tahay Abuure Danab xoojiye.

Tusaale (muunad) Mareeg Danab Furan

Samaynta mareeg furan

Ardayda is haysata laga bilaabo dhinaca taban ilaa dhinaca togan waa marinka socodka elektaroonada Marinkan waxaa lagu magacaabaa Mareegta Danabka. Mareegtu wey xidhan tahay haddii aanay jirin meel ay safka ardaydu kala go’an tahay Ama furantahay. (Fiiri jaantuska 5.3)

Jaantuska 5.3 Mareeg Danab xidhan

Mareegtu wey Furan tahay haddii ay jirto meel safka ardaydu ka kala furantahay. Ama aanu iska haysan (Fiiri jaantuska 5.4

Jaantuska 5.4: Tusaale Mareeg Danab Furan

Tusaale xadhko Dhumuc wayn

Hadda aan tixgalino Ama qaadano xadhig – danabeed Bani- aadamka. halkii aan ka isticmaali Lahayn hal-jiiftax (Fiiri Jaantuska 5.5)



Jaantuska 5.5 Tusaale xadhig Danabeed Dhumuc badan

Elektaroonada uu riixayo EMF – ku ee inuu uriixayo dhinac taban waxaa gudbinaya laba Arday markiiba. Halkan elektaroonadu waxay u gudbaan si ka dhakhso badan sidii ay ugu gudbayeen halka jiiftax. Haysashada la haysto xadhig – Danabeed dhumucda Badan waxay la micno tahay haysasho la haysto Dhaqso badida socodka elektaroonada ee mareegta

Mareegaha Danabka

Mareegta Danabku waa marin Dhammaystiran (xidhan) oo ay marto qulqulka Danabku. Waxay ka koobnaan kartaa walxo kala duwan sida Isha tamar keyd isdheerida (Foolteyjko), Furaha ujo Guluubka iwm. Waad Muujin kartaa Mareeg kasta oo Adag (kakan) Adigoo isticmaalaya summado. Heerka summadaha Danabka ee loo isticmaalo si loogu sawiro Jaantusyada mareegta Danabka.

Tusaale (Namuunad) Mareegta Barbarada ah

Marka xigta, aan qaadano Ama tixgalino labada jiiftax ee Ardayda si aan ugu kala jebino laba qeybood, si aan u samayno laba marin labada jiiftax ee ardaydu waxay ka helayaan elektaroonada dhinaca taban, waxayna u gudbinayaan Dhinaca togan ee EMF-ka. Tusaalahani wuxuu sharaxayaa in elektaroonada ay riixayaa EMF – ku ee ay soo riixayaan dhinaca tabani waxuu leeyaha laba Doorasho oo uu ku safro / qulqulo ka asoo dhex maraya gudbiyaha, marlabaad elektaroonadani waxay ku darsamaan Dhinac togan (Fiiri jaantuska 5.6)



Jaantuska 5.6 Mareegta Barbarada ah

Hubinta (xaqiijinta) 5.1

1. Qeex sida qulqulka Danabku u dhexmaro Gudbiyaha? (u isticmaa/ Beni – aadam ka xadhiga – Danabka)
2. Sheeg kaalinta uu kaga jiro xoogga Danab – dhaqaajiyuhu qulqulka Danabka?
3. Sawir
   b) mareeg Danab – xidhan
   t) mareeg- Danab. Furan, Dabadeedna sharax Faraqooda u dhexeeya

5.2 Sameynta Iftiinka Guluubka ee Korontada

Hawlgalka 5.2

Baadh waxa Iftiinka Guluubku ee korontada

1. **Qaado Guluub gubtay**
2. **Baro qeybaha (Deris) Guluubka caddie xaasawdu, meesha uu ku xidhmo, halka u sareysa iyo qeybta haysta**
3. **Sawir jaantuska Guluubka kuna muuji qeybihiisa**
4. **Sharax Muhimada xaasowda dhuudhuuban.**
5. **Goormaad dhihi kartaa Guluubku wuu Gubtay? Ama ma Guban?**

xaasowdu waxay ka Samaysan yihiin walax Bir ah oo la dhaho Taangisten. Taangistan waxay leedahay meesha ugu sareeysa ee dhalaalka Biraha. Xaasawdu aad ayey ugu dhuu dhuuban tahay kuwa koruhaya. Guluubka dhexdiisa xaasawdu waxay ku xidhan tahay taageeraha koruhaya. Mid ka mid ah taageeruhu wuxuu ku xidhan yahay Boolka ama dabada Guluubka ka kalena waxuu ku xidhan yahay salka. Guluubka shaqeynayaa wuxuu Sameeyaa Mareeg dhammaystiran marka lagu xidho Baytari (dhagax) (Fiiri Jaantuska 5.7)



Jaantuska 5.7 Iftiinka guluubka ee korontada

Sameynta Fuyuus

- Dhis mareeg Danab Adigoo isticmaalaya Guluub, Baytari 12 v ah, Fure, xadhig laysugu xidho iyo xadhko kala duwan, ku buuran iyo ku aad u dhuuban.
- Meelo Banaan u yeel mareegta si aad u geliso xadhko kala duwan
- Guluubku wuu shidmaa marka Furaha xadhkaha dhumucdoodu kala duwan tahay ka buuran kuwa dhuudhuuban laysu xidho.
- Marka xadhiga – Dabka ee dhuuban lageliyo meesha banana wuu kaahi, wuuna kululaan, Markan Guluubku wuu Bakhtiyi



Jaantuska 5.8 Samaynta qulqulka Mareegta ee Gulubka dhexdiisa.

- Xadhiga – Dabka oo ka samaysan Birta Alooy (Alloy) taas oo heerka dhalaalideedu hooseeyo waxaa la dhahaa fuyuus, Fuyuusku wuu dhalaalaa, wuxuuna kala jabiyaa Ama kala furaa mareegta marka qulqul caadiah Dhexmaro.

Fuyuusku Mareegta waxuu ka dhigaa mid Furan (aan dhamaystirnayn Marka qulqulka Danabka dhexmaray aa sareeyo.



Jaantuska 5.9 Sameynta Fuyuuska

Hawlgalka 5.3

Dhisida Mareegta Barbarada ah (Fiiri jaan 5.10)

1. **Maxaa ku dhici caddaanka Iftiinka marka labada Guluuba Shidan yihiin?**
2. **Maxaa ku dhici cadaanka Iftiinka marka Guluubyada mid laga saaro?**
3. **Maxay u dhacday in caddaanku kala duwanaado?**



Jaantuska 5.10 Mareeg Barbaro ah

Hubinta (xaqiijinta) 5.2

1. **Waa maxay saameynta ay ku leedahay qul qulka Danabku isticmaalka Guluubka?**
2. **Sawir Dhismaha Guluubka Iftiinka ee dhabta ah, kala sheeg Ama magacow qeybihiisana?**
3. **Qeex Muhimada Fuyuuska**

5.3 Xidhiidhka Ka Dhexeeya Qu Lqulka, Tamarkeyd – Isdheerida Iyo Caabiga

Fasalkii 7aad waxaad ku soo baratay sida loo soo saaro Danabka korontada iyo sida uu u qeybiyaan Gudbiyeyaashu. Marka tamar– keyd is– dheerida (foolteyj) lagu isticmaalo Gudbiyaha elektaroonada xorta ah ee Gudbiyuhu wax aybilaabaan socod. Tusaale ahaan hadda Baytari (dhagax) lagu xidho lab

ada cidhif ee xadhig Danab oo Gudbiye ah, habku Gudbinta qurubyada Danabka dhacada ayadoo cidhifka tagaysa tagaysana a cidhifka kale. Qaabkan socodka qurubyada Danabka ayaa la dhahaa sida loo sameeyo qulqulka Danabka.

Qulqulka Danabku waa saamigalka socodka Danabku kaga gudbo Bedka Dusha Gudbiyaha lagu siiyey

qulqulka Danabku = $\frac{\text{socodka Danabka}}{\text{Waqtiga ay ku qaadato}}$

Summad ahaan $I = \frac{Q}{t}$, halka

I ay tahay qulqulka Danabka,

Q – na walxaha saldanabaysan t - waqtiga ay ku qaadatay

Danabku waa xaddi Foolwaa

Su'aal Furan.

- Miyaad xasuusan tahay halbeega qulqulka Danabka?

  Magacow,

  halbeega qulqulka Danabku waa Ambiyeer(Ampere) (A)

  Waxaana loogu magac daray Saynisyahan Faransiis ah oo la dhaho Andre Marie Ampere

$$1\ \text{Ambiyeer} = \frac{1\ \text{Kuulam}}{1\ \text{Seken}}\ ; \qquad 1A = \frac{1C}{1\ s} = 1\ C/s$$

Halkii Ambiyeer waxuu la mid yahay hal kuulam oo danab ah oo dhaqaaqa sekenkiiba; qulqulka Danabka ee hal ambiyeer waxaa la heli marka Danab hal kuulam (6.25×10^{18} elektaroon) ayaa dhex maraan (dhaafaan) Gudbiyaha hal seken. Qul qulka Danabka waxaa kale oo lagu cabbiri karaa halbeeg kale oo la mid ah sida mili – ambiyeer iyo maykro-Ambiyeere

1mili Ambiyeer = 0.001A = 10^{-3}A

1 Maykro -Ambiyeer = 0.000,001A = 10^{-6}A

Tusaalaha Ka Shaqeysan ee 5.1

1. Waa maxay qulqulka madoorsoome ee la gudbiyaa marka Danab dhan 120c dhex maro gudbi yaha muddo dhan 1 daqiiqo?

siin	Waxa la rabo	Furturis
Q = 120C t = 1miridh = 60 seken	I = ?	$I = \frac{Q}{t}$ $= \frac{120c}{60s}$ = 2C/s = 2A

Sidaas darteed, qul qulku waa 2C/S = 2A

2. haddii qulqul dhan 90 mA uu dhexmaro muddo 150s ah, dabadeed waa maxay Danabka la gudbiyey?

siin	Waxa la rabo	Furfuris
I = 90mA = 0.09A t = 150s	Q = ?	$I = \frac{Q}{t}$, dabadeed Q = It Q = (0.09A) (150s) = (0.09 C/s) (150s) = 13.5C

Danabka Gudbay waa = 13.5C

Foolteyj (Tamar keyd is dheeri)

Foolteyjku waa cabbirka awooda shaqo lagu qabto waa xaddi foolwaa. Waxaa loo qaadan karaa “Tamarta Riixida” Ama “ cadaadis” ka dhex dhacaya mareegta Danabka. Ma’ aha xoog. Foolteyjwaa qeybiye, qeybiya Ilaha xoogga mootinta Danabka (EMF)

Sida Baytariga (Dhagax), Matoorka Ama unugga Footofoltayk (photovoltaic call) EMF- ka waxaa loo isticmaalaa in uu kala sooco mareegta Danabka iyo in uu abuuro xoojinta Danabka.



Jaantuska : 5.11Shaxda Mareegta ee xeerka ohm

xidhiidhka ka dhexeey a qulqulka iyo Foolteyjka

Hawlgalka 5.4

Baadhitaan ku Saabsan xidhiidhka ka dhexeeya qulqulka iyo foolteyjka.

Qalabka loo baahan yahay:- 4 Baytari (dhagax) (1.5v midkastaa), foolteyi, cabire, ambiyeer cabbire, Fure iyo xadhko Dana b oo isku xidhan.

jidka la marayo:

i) Isugu xidh walxaha la doortay sida ka muuqata jaantuska 5.11

ii) Ku xidh marka hore hal baytari (dhagax) dabadeed akhri foolteyj cabbiraha iyo qul qul – cabbiraha.

iii) Ku celi jidka xagga sare markasta laba Baytari (dhagax), seddex baytari (dhagax) iyo Afar baytari (Dhagax) oo unugaga engegan ah si taxane ah.

iv) Ku Buuxi shax da hoose mitirada ay sheegaan.

v) Xisaabi Saamiga foolteyjka (v) iyo qulqulka (I) markasta.

Tirada unugyada ee isugu xidhan taxanaha	1	2	3	4
Tamarkeyd is dheerida (V)				
Qulqulka (I) (A)				
Saamiga $\frac{V}{I}$				

vi) Sawir Garaafka V ~ I.

vii) Isbarbar –dhig Saamiga tiirada Garaafka (Jaantuska 5.12)

- **Maxaad Aragtaa**
- **Sidee ayuu qulqulku u Kordhaa Ama hoos ugu dhacaa, haddii la kordhiyo Ama la yareeyo Foolteyjka (Tamar keyd isdheerida)?**

Qul qulka Hawlgalka 5.4 wuu kordhaa marka uu kordho. tamarkeyd is dheeridu; sidoo kale wuu yaraadaa marka ay yaraato tamar is dheeridu?

Ninka layidhaahdo “George Simon Ohm” oo ahaa Fisigisyahan Jarmal ah ayaa cabbiray qulqulka danabka ee dhex maraya gudbiye loo adeegsaday ama kagudbayso tamar isdheeri kala duwani.

Tana Waxaa lagu agaaday xeerka ohm:-



Jaantuska 5.12 Garaa fka Tamar keyd isdheerida iyo qul qulka.

Xeerka Ohm Wuuxu Sheegayaa:

" Qulqulka dhexsocoda birgudbiye ah heerkul Joogto ah, Wuxuu saamigal too san ku yahay Tamarkeyd isdheerida udhexaysa labada cidhif".

Xisaab ahaan Waxaa loo qeexi karaa xeerka Ohm Sidan:-

: $\frac{\text{Tamarkeyd isdheerida}}{qulqulka}$ = madoorsoome

Waa saamigalnimada madoorsoo maha ee astaan gaarka u ah qudbiyaha birta ah Madoor Soo mahana Waxaa loo yaqaa caabiga qudbiyaha.

Waa maxay caabigu?

Caabiga Waxaa loo qeexaa inuu yahay Lidka qulqulka danabka ee dhexmaraya gudbiyaha. Sida Kamuuqata Hawlgalka 5.4

Cabiga gudbiyahana waxaa loo qeexaa inuu yahay Tamarkeyd isdheerida iyo qulqulka.

Calaamad ahaana waa sidan. $R = \frac{V}{I}$ marka

V= fooltejka (V)

I = qulqulka (A)

R = Caabiga (Ω)

Halbeega Caalamiga ee caabiguna waa ohm (Ω)

$$1\ \text{ohm} = \frac{1\ \text{volt}}{1\ \text{amp}}$$

Shaxan mareegta caabigu waxaa u taagan Calaamadahan:

Xeerka ohm wuxuu sax kuyahay kaliya xaalado gaara ah. Wuxuu sax ku yahay biraha gudbiyaha ah ee herkulka madoorsome.

Tusaale 5.2

1. Waa imise caabiga laambad qulqulka danabkeedu yahay 0.5A, , marka lagu xidho 2V oo baytariah?

Siin	Weydiin	Fur-furis
V = 2V	R = ?	$R = \frac{V}{I}$
I = 0.5A		$R = \frac{2V}{0.5A} = 4\Omega$
∴ caabiga guluubku = 4Ω		

2. Waa imisa qulqul dhex maraya marka 10 Ω oo caabiah lagu xidho 2V oo barytariah?

Siin	Weydiin	Fur-Furis
R = 10 Ω	I = ?	V = IR
V = 2V		$I = V/R = \frac{2v}{10\Omega}$
		I = 0.2A

3. Caabi dhan 200Ω ayaa lagu xidhay qulqul danab dhan 1.15A, Waa imisa tamar keyd isdheeridoodu?

Siin	Weydiin	Fur-Furis
R = 200Ω	V = ?	V = IR
I = 1.15A.		V = 1.15A × 200Ω
		V = 230V

∴ Sidaas darted tamarkeyd isdheeridu = 230V

Xaqiijin 5.3

1. Qeex Weedhahan soo Socda
   b) Qulqulka danabka
   t) Foolteyj (tamar keyd is'dheeri)
   c) Ambiyeer
   d) Caabiga
2. Waa maxay magaca kale ee loo yaqaan foolteejka?
3. Sheeg xeerka ohm
4. Buuxi, Halbeegyada iyo calaamada. Xadiyado sal leh ee shaxda hoose ku qoran.

Tiro	Xaddi Saleedka	Sumada	Calaamada Halbeega
1	Qulqulka danabka		
2	Tamar keyd isdheerida		
3	Caabiga		

5.4 Cabbirida, Qulqulka Danabka, Tamar Keydisdheerida, Iyo Caabiga

Waxaad ogsoontahay in xadiyada danabeed ay ugu muhiimsan yihiin qulqulka, Tamarkeyd isdheerida, iyo caabigu. Hadaba Waad cabbiri kartaa xadiyadan adigoo mareegta danabka u adeegsanaya qalabyo kala duwan.

Cabbir qulqulka danabka adigoo ku cabbiraya (Ammeter) (qalabka lagu cabbir qulqulka)

Qulqulka danabka ee mareegta Waxaa lagu cabbiraa qalabka loo yaqaano: (Ammeter).



b) Shaxanka mareegta dul ahaan



t) Shaxanka calaamada Mareegta

Jaantuska 5.13 Kuxidhida (Ammeterka)

Adigoo isticmaalaya (Ammeterka)

- Isugu xidh sitaxane ah caabiga ama Sida ka muuqata Jaantuska 5.13.
- Waligaa ha isugu xidhin si is waydaar ah cidhifyada baytariga adigoon haysan ugu yaraan caabi (ceeliyaha danabka) oo u xidhan si taxane ah.
- Ha isugu xidhin caabiyada si bar- baro ah.

Hawlgalka 5.5

Cabbirida qulqulka danabka mereeg u xidhan si bar-baro ah (Jaan 5.14)

Qalabka loo baahanyahay:- Ammeter, 2 guluub iyo 6v oo baytiri ah .

1. **Ku xidh ammeterka meesha (1), si aad u cabbirtid qulqulka ka imanaya baytariga.**
2. **Ku xidh ammeterka si, aad cabbirtid qulqulka qeyb kasta (meela ha (2) iyo (3)).**
3. **Maxaad kugabagabeyn lahayd qulqulka meelaha (1), (2) iyo (3)**
4. **Qeyb tee baa mareegtan bar-barada ah leh qulqulka ugu badan? Sabab?**



Jaantuska 5.14 Cabbirka qulqulka mareeqta bar - barada

Wadarta qulqulada ee mareegta Barbarada ahi waxay lamid tahay qulqulka ka imanaya baytariga.

Cabbirada Tamar Keyd isdheerida oo lagu cabbirayo (Voltmeter) (Tamarkeyd cabbire).

Tamarkeyd is dheerida ka gudbaysa laba barood oo kasta oo mareegta ka mid.ah Waxaa lagu cabbiraa qalabka loo yaqaano (Voltmeter) (Tamar keyd cabbire).

Adigoo isticmaalaya voltmeter:

- Isugu xidh si bar-baro ah caabiyda si aad u cabbirto Tamar keyd isdheerida ka gudbeysa caabiga.
- Isugu xidh sibar –baro, baytariga ama unug kuwaas oo aad dooneysid inaad tamar keyd isdheeri diisa cabbirtid. Sida ka muuqata Jaantuska 5.15.
- Waligaa ha isugu xidhin si taxane'ah ilaha caabiyada ama Tamarkeydisdheerida.



b) Shaxanka ka mareegta dul, ahaan.



t) Shaxanka mareegta calaamada ahaan

Jaantuska 5.14 Isku xidhka voltmeterka

Hawlgalka 5.6 Cabbirida tamar keyd isdheerida mareegta bar-barada ah sida ka muuqadata (Jan 5.16)

Qalabka loo baahan yahay:- fooltimitir, 2 Guluub iyo 6V oo baytairi ah.

1. Isuguxidh fooltimitirka iyo baytariga si, gudub, ah, kadibna diwaanga liakhrintiisa.
2. Isuguxidh, fooltimitirka iyo guluub kasta si gudub, ah ee mareegta bar-barada ah kadibna, kala sooc, diwaan galinta akhrintooda.
3. Isbar-bardhig Tamar keydisdheerida ka gudbaysa guluub kasta.



Jaantuska 5.16 Cabbirada Tamar keydisdheerida ee mareegta bar-barada ah

Tamarkeyd isdheerida kagudbaysa guluubka oo kamida mareegta bar- barada ahi waa iskumid.

Foltimitir, iyo ammitir waa kuwa loo adeegsado saameynta birlab danabeedka qulqulka danab. Marka la isticmaa layo qalabkan, waa in cidhifkooda toganaha ah (+) lagu xidhaa cidhifka tabanha ah ee isha mootiyaha xooga danabka. Sidoo kale cidhifyadooda tabanaha ah (-), la gu xidhaa cidhifyada tabanaha ah (-) ee isha mootiyaha xooga danabka. Sida ka muusqata Jaantuska 5.13 iyo Jan 5.15

Cabbirada caabiga iyadoo lagu cabbirayo Fooltimitir iyo ammitir.

Caabiga guluub waxaa la cabbiri karaa iyadoo la isticmaalayo iskudarka Foltmitir ammitir iyo xeerka ohom. Xeerka ohom Waad ku cabiri kartaa. Caabiga guluubka. (Fiiri:- Jaan 5.17)



Jaantuska 5.17. Cabbirida Caabiga guluubka

Hawlgalka 5.7

Cabbirida Caabiga guluubka

Qalabka loo baahanyahay: **guluubyo kaladuwan ammittir, Foltimitir, 6V baytari; xadhkaha oo iskuxidhan.**

Habka laraacayo:

1. **Iskuxidh ammitirka, fooltimitir, guluubka, baytariga iyo xadhkaha isku xidhan sida ka muuqada. (Jantuska 5.17)**
2. **Cabbir qulqulka mareegta oo diwaan gali akhriskiisa.**
3. **Cabbir tamar keyd is dheerida ka gudbaysa guluubka adigoo isticmaalaya Fooltimitrika oo diwaan gali akhriskiisa.**
4. **Xisaabi saamiga tamar isdheerida iyo qul qulka danab, adigoo isticmaalaya xeerka ohom.**

Saamiga tamar isdheerida iyo qulqulka danab ee guluubku wuxuu ina siinayaa caabiga guluubka xaasawda. Guluubyada kala duwani waxay leeyihiin caabiyo kala duwan.

Caabiyadu waa qalab danabeed ka sameysan caabiye qulqulka danabka. Hadaba waxaa Jira caabiyo fara badan oo danab caabiyaal ah, Tusaale ahaan raadiyawga, tilifishinka. Badanaa caabiyadu waxay ka sameysan yihiin xadhig danabeed leh dherer. (Fiiri, Jaantuska: 5.18).



Jaantuska 5.18. caabiyada

Midab ku calaamadaynta caabiyada

Midabada lagu calaamadiyo caabiyada qiimaha caabiga wakhtigyada qaarkood, waxa loo isticmaalaa inuu ina tusiyo. Calaamad midab sida ka muugata (Jaantuska 5.19) Kaas oo in a tusaya midabada calaamadaha ah ee lagu calaamadiyey, caabiga.

Qiimaha caabinta caabiga waxaa la inagu siiyey xaga sare Jaantuska 5.19, Waxaana lagu xisaabiyey, sidan:-

Cagaarku waa 5, buluugu Waa 6, huruudu waa 10kΩ, sidaas darted caabinta caabigu Waa 560kΩ (560,000Ω). Sidaas silamidah, Waxaad radisaa caabinta caabiyaha ee la inagu siiyey shaxdan hoose.



COLOR	1st BAND	2nd BAND	3rd BAND	MULTIPLIER	TOLERANCE	
Madaw	0	0	0	1Ω		
Buni	1	1	1	10Ω	± 1%	(F)
Casaan	2	2	2	100Ω	± 2%	(G)
Liin	3	3	3	1KΩ		
Huruud	4	4	4	10KΩ		
Doog	5	5	5	100KΩ	±0.5%	(D)
Buluug	6	6	6	1MΩ	±0.25%	(C)
Basali	7	7	7	10MΩ	±0.10%	(B)
Takhah sibidhi	8	8	8		±0.05%	
Ame boor	9	9	9			
				0.1	± 5%	(J)
				0.01	± 10%	(K)

Jaantuska 5.19 Midabku calaamadeynta caabiyada

Xaddiyada saameynta ku leh caabiga Gudbiyeyaasha

Caabiga gadbiyuhu wuxuu ku xidhan yahay walaxda Asalkeeda (waxay, ka Samaysan tahay), dhererka iyo Bedkeeda (Bedka uu kagudbayo). Marka heerkulku Madoorsoome yahay. Xaddiyadan soo socdaa waxay Saamayn ku leeyihiin caabiga Gudbiyaha



b) dherer *t) Bedka - gudbiyaha*

Jaantuska 5.20 Xaddiyada Saameynta kuleh caabiga

i) **dhererka: Caabiga gudbiyuhu Wuxuu Saamigal quman Ku yahay dhererka Gudbiyaha (xadhiga Dabka). Tani waxay tahay haddii la dheereeyo xadhiga caabigu wuu badan, haddii xadhiga la gaabiyana, caabigu wuu yaraan Asagoo Ku xidhan walaxda lagu Siiyey iyo Bedka Dusha uu ka gudbayo.**

Xidhiidhkan waxaa la sharixi Karaa ayadoo la isticmaalayo isku – dhaca elektaroonada xorta ah ee Gudbiyaha dhexdiisa.

Marka dhererka gudbiyahu kordhoba, Tirada isku dhaca kaas oo ay Sameeyaan elektaroona ku safraya Gudbiyaha dhexdiisu sidoo kale way kordhaan. Haddaba, qulqulku aayar ayuu socdaa xadhkaha danabka ee dhaadheer dhexdooda. Kuwa gaagaabana Ama xadhkaha Dabka ee Gaagaabana gudubku wuu Degdegaa (jaantuska 5.20 (b))

ii) ***Bedka- Dusha Gudbiyaha: caabiga Gudbiye wuxuu Saamigal rogaal ah ku yahay Bedkiisa: sida:- Bedka Dusha Gudbiyuhu waxay ina tustaa Dhumucda Gudbiyaha. Xadhiga Dabku haddii uu dhumuc weyn yahay Bedka- Dushiisu way balaadhantahay. Haddii Bedka Dusha Gudbiyuhu yaraato caabiga xadhiga Gudbiyaha ahi wuu kordhaa. Caabiga xadhiga Gudbiyaha ahi wuu yaraadaa marka Bedka – Dusha Gudbiyuhu korodho (Jaantuska: 5.20 (t))***

Waxaad Barbar – dhigi kartaa xidhiidhkan ka xadhid – Danabeedka Bani – aadamka ee aad ku soo baratay geybta 5.1

Guryaheena xadhkaha Dabka ee Buuran Ama dhumucda leh waxaa loo isticmaalaa Dhalaalinta Biraha Danabka iyo makiinadaha Alxanka. Halka xadhkaha Dabka ee dhuudhuuban looga isticmaalo Guluubyada Korontada, Raadiyowga Ama idaacada, telefishanka, Bahalaha Moobaylada lagu dabeeyo iwm.

iii) ***Waxaay ka Sameysan yihiin walxaha Gudbiyeyaasha ahi: waxay ka Samaysan yihiin Wuxu Go'aamiyaa Ama saamayn ku leeyahay caabiga Gudbiyaha: sida Walxo Gudbintoodu kala duwan tahay waxay leeyihiin Awood kala duwan oo ay ku gudbiyaan qulqulada korontada.***

iv)Heerkulka: Caabiga gudbiyuhu Wuxuu ku xidhan yahay heerkulkiisa. Marka heerkulka gudbiyuhu Kordhoba, caabigiisu wuu kordhaa, in kastoo xeerkii ohm uu ogolaa inay run ku tahay walxaha heerkulkoodu aanu isbedelin.

Hubinta (xaqiijinta) 5.4

1. **Qeex sida loogu xidho Amitirka (qulqul cabire)iyo fooltmitir (Tamar keyd – isdheeri cabbire) mareegta?**
2. **Sawir jaantuska mareegta Adigoo isticmaalaya Summadaha amitirka iyo fooltimitirka.**
3. **Sharax sidaa aad ugu cabbiri Karto caabiga Amitir iyoo fooltmitir.**
4. **Qeex midab ku astaynta caabiyada.**
5. **Waa maxay xaddiya Ama waxyaalaha Saameynta ku leh caabiga gudbiyaha.**

5.5 Qaaciidooyinka Lagu Xisaabiyo Isugeynta Caabiyada Ee Taxanaha Iyo Barbarada Ah

Hawlgalka 5.8

- **Sharax waxa ay la micno tahay Guluubyo isugu xidhan sitaxane iyo Barbaro ah?**
- **Sidee ayuu Guluubka Iftiinka ee Gurigiinu u xidhan yahay?**
- **Miyaad shidi kartaa Ama Bakhtiin karaa Guluubyada Gurigiina oo dhan adigoo isticmaalaya hal Fure oo kaliya? Sharax side.**

Caabiyada Danabka Guryaheena intooda badani waa maxsuulka hab mareego oo laysu geeyey. Xeerka ohm wuxuu isticmaalaa si uu u helo qulqulka mareegta Ama qeyb ka mid ah mareegta. Marka gudbiyeyaasha laysku xidho si ay u sameeyaan Mareeg, Waxa laga yaabaa in dhammaantood ay isu xidhan yihiin sida:- silsilada sida ka Muuqata (jaantuska 5.21 (b)) Ama waxa laga yaabaa in qaar isugu xidhan yihiin Barbaro sida ka muuqata (jaantuska 5.21 (t)). Sida ay u habaysan yihiin qeybaha Mareegtu waxay saameyn ku leedahay socodku qulqulka ee dhexmaraya mareegta. Aasaas ahaan waxaa jira laba nooc oo Mareegood. Waxayna yihiin Mareegta taxan iyo Mareegta Barbarada ah.

- Jaantuska 5.21 (b) caabiyada R_1 iyo R_2 waxay isugu xidhan yihiin si taxane ah.
- Jaantuska 5.21 (t) caabiyada R_1 iyo R_2 waxay isugu xidhan yihiin Barbaro.



b) Isu kidhnaanta Taxaanaha ah ee R_1 iyo R_2



t) isu xidhnaanta Barbarada ahee R_1 iyo R_2

Jaantuska 5.21 Isku – xidhida caabiyada

Caabiyada Mareegta taxanaha ah

Mareegta aan lahayn wax qeybo ah waxaa la dhahaa Mareegta taxanaha ah. Caabiyada midba midka kale ayuu ku daba xidhan yahay.

Marka caabiyadu isugu xidhan yihiin si taxane ah, qulqulku wuxuu u dhexmaraa caabiga mid-mid.
Jaantuska 5.22 wuxuu ina tusayaa laba Guluub oo isugu xidhan si taxane ah.

Qulqulka dhexmaraya caabikastaa waa isku mid mareegta taxanaha ah. Taas macnaheedu waa jaantuska 5.22 amitirada A_1, A_2 iyo A_3 waxay sheegayaan qulqul isku mid ah.



Jaanstuska 5.22 Qqulqulka mareegta taxanaha ahi waa isku mid.

Hawlgalka 5.9

Si loo tuso in qulqulka mareegta taxanaha ahi isku mid yahay:-

Qalabka loo baahan yahay: 2 toosh mitir, Amitir, laba guluub oo Kuwaa ilayska ah, xadhig isku xidha iyo laba baytari ama dhagax (1.5v midkastaa).

Jidka la marayo: **1. Isku – xidh Guluubyada iyo fooltmitirka sida ka muuqata shaxan ka 5.23**

2. **Ayadoo la dhigayo amitirka meelo kala duwan (sida b, t iyo j) qaado qiimayaasha qulqulada.**
3. **Qaado qiimayaasha foolteyjka ee u kala gudbaya Guluubka L_1 iyo Guluubka L_2 ee (jaantuska 5.23).**

- Qiimaha qulqulku ma isku midbaa? Mise wuu kala duwan yahy?

- isbarbar – dhig tamar – keydisdheerida ka gudbaysa foolteyjka Guluub kasta iyo wadarta foolteyja.

Haddii aad u samaysid hawlgalka 5.9 si sax ah. Dabadeed waxaad heli doontaa maxsuulada soo socda ee muhiimka ah.

1. Qulqulka maraya caabi kasta ama guluub kastaa ee mareeg taxane ahi waa isku mid sida:$I_1 = I_2 = I$
2. Mareegta taxanaha ah wadarta foolteyjyada ee maraya caabiye kastaa waxay la mid yihiin wadarta foolteyjka sida:$V= V_1 + V_2$

Inagoo ku saleyneyna labada isie'eg ee xagga sare iyo qeexida caabiga ee xeerka oom, waad xisaabin (Raadi) kartaa caabiga isu – dhiganka ee isu – taga caabiyada taxanaha ah.

Maadaama $V = V_1 + V_2$ iyo $R_1 = \frac{V}{I}$

Dabadeed $V_1 = R_1 I$ iyo $V_2 = R_2 I$

$V = R_1 I + R_2 I$

$= I(R_1 + R_2)$

$\Rightarrow IRt = I(R_1 + R_2)$

$$R_t = R_1 + R_2$$



(a) (b) (c)

Jaantuska 5.23 Cabbirida qulqulka danabka ee mareegta taxanaha ah

Mareegta taxanaha ah, wadarta caabigu (isu – dhiganka caabigu) waxuu la mid yahay wadarta caabiyada caabi kasta tani macnaheedu waa, laba caabiye waxaa lagu bedeli karaa hal caabi isu – dhigan.

Tusaalaha laga shaqeeyey ee 5.3

1. laba caabi oo awoodood tahay 6Ω ayaa midkasta waxaa si taxane ah loogu xidhay baytari kaasoo soo saara 36V mareegtan Raadi
   b) Wadarta caabiga
   t) Qulqulka maraya mareegta

Siin	Waydiin	FurFuris
$R_1 = R_2 = 6\Omega$ $V = 36V$	b) $R_t = ?$ t) $I = ?$	b) mareegta taxanaha ah, $R_t = R_1 + R_2$, $\Rightarrow R_t = (6+6)\Omega = 12\Omega$ $\therefore$ sidaas darted isu – dhiganka caabigu waa12Ω t) Markaan ueegno xeerka oom $I = 3A$ $\therefore$ Sidaas darted qulqulka dhexmaraya mareegtu waa 3A

2. Jaantuska mareegta ee ka muuqata shaxanka 5.24 Raaeli;



1. Wadarta caabiga
2. Amitirku waxa uu sheegayo
3. Fooltmitirku wuxuu sheegayo

Jaantuska 5.2; Caabiyo xidhan si taxane ah.

Jaantuska5.24 waxaan ku aragnaa in $R_1=24\Omega$, $R_2= 36V$ iyo $V=180V$ ay yihiin taxane hadaba

b) Wadarta caabigu waa $R_t = R_1+R_2 = 24\Omega + 36\Omega = 60\Omega$

t) Amitirku wuxuu sheegayaa in qulqulku uu la mid yahay qulqulka I ee dhexmaraya

$$\text{mareegt } I = \frac{V}{R} = \frac{180V}{60\Omega} = 3A$$

j) Fooltmitirka ka gudbaya R_1 wuxuu la mid yahay $V_1=IR_1= (3A)(24\Omega)=72V$

$V_2=I_2R_2=(3A)(36\Omega)=108V$

Caabiyada Mareegta Barbarada ah

Mareegta taasoo u kala qaybsan laba ama in ka badan oo qeybood waxaa la dhahaa mareeg barbaro ah, tusaale ahaan laba caabiye waxaa la dhahaa waxay isugu xidhan yihiin Barbaro marka ay isu garab yaalaan dhinac dhinac ee labadooda dhinac ee isu – beeganina ay isu xidhan yihiin.

Jaantuska 5.25 wuxuu ina tusayaa laba caabi oo isugu xidhan Barbaro

Shaxanka 5.25 wadarta qulqulka (I) waxay u qeybsantaa I_1 iyo I_2 bar kulanka A. iyo I_1 iyo I2 waxay isaga xidhmaan barta B si ay inoo siiyaan mar labaad wadarta qulqulka taasoo ah $I = I_1+1_2$



Jaantuska 5.25 Laba caabi ooisugu xidhan barbaro

Hawlgalka 5.10 Si loo cabbiro qulqulka qeybkasta oo ka mid ah qeybaha caabiga barbarada ah

Qalabka loo baaha yahay: laba unug oo 1.5V ah, xadhig isu xidha, laba Guluubyada la shito ah iyo Amitir.

Jidka la Raacayo:

1. Isugu xidh Guluubyada si Barbaro ah
2. Qor waxa uu sheegayo Amitirku (qalabka lagu cabiro qulqulka) meelaha kala duwan sida ka muuqata. Jaantuska 5.26
3. Isbarbar – dhig wadar qulqulka iyo wadarta qulqulada dhexmaraya labada Guluub miyey la mid tahay wadarta Guud ee qulqulka?



Jaantuska 5.26 Cabbirida qulqulka mareegta Barbarada ah

Hawlgalka 5.11 si loo cabbiro Foolteyjka ka gudbaya caabi kaste

Qalabka loo baahan yahay: laba unug oo ah 1.5V midkiiba, xaalhkaha Dabka oo isku – xidha labad Guluub ee ilayska iyo fooltmitir.

Jidka la marayo: 1. Isugu xidh guluubyada si barbaro ah.

2. Dhig fooltmitirka meelkasta oo caabi ah mareeg kasta sida ka muuqata jaantuska 5.27
3. Qor waxa uu sheegayo fooltmitirku dabadeedna Barbar dhig foolteyjka guud ee unugyada.
   - Ma isku midbaa foolteyjka maraya caabi kasta?
   - Foolteyjka maraya caabi kastaa ma la midbaa, wadarta Guud ee foolteyjka unugyada?



Jaantuska 5.27 Cabbirida foolteyjka mareegta barbarada ah

Haddii hawlgalka 5.10 iyo 5.11 loo qabto si sax ah, dabadeed waxaad heli doontaa maxsuuladan soo socda.

1. Wadarta qulqulada dhex maraya labada Guluub waxay la mid tahay wadarta guud ee qulqulka, taasi waa $I= I_1+I_2$
2. Foolteyjka ka gudbaya guluub kastaa wuxuu la mid yahay foolteyjka guud ee la siinayo, taasi waa
   $V = V_1=V_2$
3. Adigoo isticmaalaya xeerka ohm iyo isle' egyada sare waxaad heli kartaa xidhiidhka muhiimka ah ee ku saabsan wadaarta Guud ee caabiga laba caabiye oo isugu xidhan Barbaro.

Haddii $I = I_1 + I_2$ iyo $I = \frac{V}{R_t}$ (xeerka oom)

Halka $I_1 = \frac{V_1}{R_1}$ iyo $I_2 = \frac{V_2}{R_2}$ dabadeed;

$\Rightarrow I = \frac{V}{R_t} = \frac{V_1}{R_1} + \frac{V_2}{R_2}$ laakiin $V_1=V_2=V$

Hadaba $\frac{V}{R_t} = V\left(\frac{1}{R_1}+\frac{1}{R_2}\right)$

Ama $\boxed{\frac{1}{R_t} = \frac{1}{R_1}+\frac{1}{R_2}}$

Wadarta caabiga labada caabiye ee R_1 iyo R_2 ee isugu xidhan Barbaradu wey ka yar yihiin ta caabiya caabi kasta. Isugu xidhida laysugu xidho caabiyada Barbaro waxay yaraysaa caabi isudhiganka waxayan kordhisaa wadarta qulqulka, isticmaal qaababkan la fududeeyey ee soo socda si aad u hesho caabi isudhiganka R_t

$$R_t = \frac{R_1R_2}{R_1+R_2}$$

Qaaciidadani kaliya waxaa lagaga shaqeyn karaa kaliya caabiyada barbarada ah waxaanad isticmaali kartaa hab – xisaabeed ka isu geynta jajabyada si loo helo qiimaha R_t.

